NEWPORT CITY COUNCIL
CYNGOR DINAS CASNEWYDD

MENTER IAITH CASNEWYDD

Ilmahaaga Af Welsh u dooro

Waa maxay waxbarasho af Welsh ku baxda?

Waa ay dhici kartaa in aadan horey uga fikirin iskuulada af Welsh lagu barto. Markaa maxay ilmahaaga siiyaan?

Iskuulada af Welsh lagu barto waa kuwo **gebi ahaanba** af Welsh **wax lagaga barto**. Waxaa ilmaha lagu dhiirigeliyaa inay af Welsh adeegsadaan maalinta ay iskuulka joogaan oo idil oo duruusta labo luqad baa lagu bartaa.

Iskuulada af Welsh wax lagu barto **waa ay u dabaaldegaan labo luqadood ku hadalkooda**, oo waxa ilmaha la siiyaa fursad ay ku koraan iyaga oo leh xirfadaha ugu badan ee suurtogalka ah.

Af Welsh waa luqadda ugu muhiimsan ee gudaha iskuulada af Welsh lagu barto, af Ingiriis isna heerka aasaasiga ah ka dib ayaa da' kasta loo baraa sidii uu afkooda koowaad yahay.

Ilmaha ka baxa iskuulada af Welsh lagu barto waa kuwo af Welsh iyo af Ingiriis aad ugu hadla, waxaana la siiyaa fursad **ay labada luqadoodba** manhajka oo dhan u adeegsadaan. Waxaa la xaqiijiyey inay sidan taay sida ugu waxtarka badan ee luqadaha lagu barto.

98% oo ka mid ah ardayda iskuulada af Welsh lagu barto ee Newport ku yaal **waxa ay ka yimaadaan qoysas aan af Welsh ku hadlin.**

Maadaama aysan waalidiinta intooda badan af Welsh ku hadlin, **waxa ay iskuulada wax kasta ku bixiyaan af Welsh iyo af Ingiriis.** Iskuulada Newport ku yaal waxa kale oo ay taageero u fidiyaan qoysaska aysan luqadooda aheyn af Welsh iyo af Ingiriis midkoodna.

NEWPORT
CITY COUNCIL
CYNGOR DINAS
CASNEWYDD

MENTER IAITH
CASNEWYDD

Ilmahaaga Af Welsh u dooro

Ma wax faa'ido ah baa ku jirta in aan ilmahayga u diro iskuul af Welsh lagu barto?

Waxyaabo badan oo faa'ido ah baa ku jirta inaad ilmahaaga u dirto iskuulada af Welsh lagu barto. Faa'idooyinka waxa ka yimaadaan ka mid ahaanshaha bulsho iskuul **oo barashada luqadaha u dabaaldegta.**

Cilmi-baarista waxa ay muujineysaa in ilamaha luqado badan ku dhex kora ay sii hagaajineyso hore u uu ilmaha da' yaraantiisa sameynayo iyo in ay u badan tahay in uu **waxbarashada ku guuleysto.**

Luqadaha oo da' yar lagu barto ayaa **sii sahleysa** sii barashada luqado kale oo badan. Waxa ay ilmaha dhigta iskuulka af Welsh lagu barto ee Newport intooda badan ka yimaadeen **goobo iyo xaalado kala duwan oo waxaa dhici karta in ay luqad kale ku hadlaan.** Xirfadahan dheeraadka ah ayaa ilmaha ku kaalmeeya in ay iskuulka ku bartaan af Welsh iyo af Ingiriis.

Waxa ay cilmi-baarista tilmaameysaa in dadka luqado badan ku hadli kara ay qabaan **maskax caafimaad** leh. Ilmaha ku hadla wax hal luqad ka badan **wax u feejignaanta ayey ku fiican yihiin** ee waa ay yar tahay inta ay wax ama meel kale ku mashquulayaan.

Ku hadalka af Welsh waxa uu kuu kordhinayaa fursadaha aad gudaha Wales shaqo uga heli kartid, oo 25% oo ka mid ah dadka gudaha Newport ka shaqeeya waxa ay u shaqeeyaan qeybta adeegyada dadweynaha waana ku waajib inay adeegyada af Welsh ku bixiyaan.

Waxa ay aad ugu badan tahay in aad **hesho shahaado degree ah** oo aad ku sii hesho shaqooyinka sareeya sida takhtarnimada marka lagu barbardhigo kuwa aan af Welsh ku hadlin.

Shereen waayo-arragnimadeeda

"Waxa iskuulka dhex jooga waalidiin badan oo aan af Welsh ku hadlin. Safar baad wada galeysaan, iskuulada waa kuwo mar walba wax taageera, oo wax walba labo luqadood bay kuugu soo dirayaan. Mar walba waxaa jira taageero aad ku xisaabtami kartid!"

NEWPORT CITY COUNCIL
CYNGOR DINAS CASNEWYDD

MENTER IAITH CASNEWYDD

Ilmahaaga Af Welsh u dooro

Waa kuwee iskuulada af Welsh lagu baro oo aan dooran karo?

Dhamaan iskuulada hadda af Welsh lagu barto ee Newport ku yaal waa **kuwo ku jira qeybaha sareeya** ee gudaha Wales ku yaal marka la isku barbardhigayo sida ay hawl fulintoodu tahay.

Iskuul Hoose (Primary School) oo af Welsh lagu barto oo cusub ayaa iskuulkii hore ee Caerleon Lodge Hill Infant School, ka furi doona wixii ka bilowda Sebtembar 2021, oo mar hore ku hawlgeli doona sidii uu yahay abuur ahaan loogu tallogalay ardayda ah dhallaanka iyo soo dhaweynta (nursery & reception) oo keliyah. Iskuulka waxa uu ahaan doonaa Ysgol Gymraeg Nant Gwenlli.

Marka laga hirgeliyo goobgta Caerleon ah ayuu Ysgol Gymraeg Nant Gwenlli u sii gudi doonaa ahaanshaha iskuul si cusub loo qalabeeyey oo ku yaal halka uu iskuulka hoose ee Pillgwenlly Primary school hadda ku yaal.

Ysgol Gymraeg Nant Gwenlli waxa uu ahaan doonaa iskuulka ugu horeeya oo lahaada **Saldhig Waxbarasho u Xilsaaran una Qalabeysan** oo taageerta ilmaha qaba baahida dheeraadka ah ee Waxbarashada la xiriirta.

Waxaa kale oo uu lahaan doonaa unug si gebi ahaan ah wax loogu barto, kaas oo ilmaha af Ingriis wax ku barta u ogolaanaya inay wax ku barashada af Welsh loo dedejiyo si ay af Welsh wax ku barashada u bilowdaan.

Waxaa jira fursado cusub oo badan oo laga helayo iskuulka cusub ee af Welsh wax loogu barto oo bixinaya taageero bulsho oo uu halbowlaha u yahay Xeerka sida midka in waalidiinta la siiyo duruus af Welsh ku baxa.

Si aad macluumaad dheeraad ah oo iskuulo qaas ah ku saabsan kala xiriir:

Ysgol Gymraeg Casnewydd
01633 290270 @YsgolGCasnewydd

Ysgol Gymraeg Ifor Hael
01633 414694 @IforHael

Ysgol Gymraeg Bro Teyrnon
01633 850804 @BroTeyrnon

Ysgol Gymraeg Nant Gwenlli
01633 850804